

Midnimadu waa jiritaankeenna, kala qaybsanaantuna waa burburkeenna

• ka fakarid • danwadaag danwadaag • iswaafaqid



Sababta aad ugu biireysid ururka shaqaalaha?

Ka mid noqoshada ururka shaqaaluhu waa go'aan sax ah oo muhiim ah. Markii aad xubin ka noqotid ururka, waxaa wakiil kaa noqonaya xiriirka ururka shaqaalaha oo goobtaada shaqo.

Marka dadku sii bataanba waxaan yeelanaynaa awood dheeraad ah oo aan ku xaqiijinno mushahaar qof walba u qalma, shaqooyin waara iyo weliba macaamil fiican oo goobaha shaqada ka hirgala. Ujeddada Fagforbundet (Xiriirka Ururrada Shaqaalaha Dawladaha Hoose iyo Shaqaalaha Guud) waa in takoorka laga cirib-tiro suuqa shaqaalaha oo shaqaaluhu ay yeeshaan awood ay wax kaga beddeli karaan goobaha iyo waqtiga shaqada.

Macnaha dhabta ah ee ka mid noqoshada ururka shaqaaluhu waa inaad u oggolaatid in ururku kuugu doodo xaqa aad adiga iyo saaxiibadaaba u leedihiin mushahaar iyo goob shaqo oo fiican. Fagforbundet wuxuu si aad ah ugu dadaalaa sidii loo heli lahaa shaqooyin iyo adeeg dadweyne ay tayadoodu sarreyso.

Marka aad xubin ka noqotid Fagforbundet waxaad xaq u yeelanaysaa faaiidooyinka xubunnimada ee kala duduwan. Waxaan bixinnaa barnaamijyo caymis oo aad u fiican, waxbarasho sare oo bilaash ah iyo fursado qofku uu kaga qaybgeli karo koorasyo iyo barnaamijyo bulsho oo lagu qabto xarunta ururka ee degmada aad deggan tahay.

Dheh waan rabaa iskaashiga goobaha shaqada – oo ka mid noqo Fagforbundet!

Midnimadu waa jiritaankeenna, kala qaybsanaantuna waa burburkeenna

Markaad xubin ka noqotid Fagforbundet waxaad ku biireysaa urur degmo. Fagforbundet wuxuu Norway ku leeyahay ku dhowaad 550 urur oo ku kala yaal Dawladaha Hoose, Cisbitaallada iyo shirkado guud iyo kuwo gaarba.

Fagforbundet waa ururka shaqaale ee ugu weyn Norway wuxuuna hoos tagaa Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Norway. Hawshayada ugu weyni waa xaqiijinta mushahaar u qalma qofka shaqaalaha ah iyo xaalado shaqo oo wanaagsan. Aragtida Fagforbundet waa hantiwadaag caddaalad ku dhisan iyo bulsho siman. Haddaba si yoolashaas loo gaaro waxaynu u baahannahay dhaqdhaqaaq shaqaale oo adag awood sarena leh.

Fagforbundet wuxuu u hawlgalaa sidii suuqa shaqada looga hirgelin lahaa dhaqammada ay ka midka yihiin is-tixgelinta, iskaashiga iyo kala dambeynta.

Kooxo xirfadeed

Inkastoo Fagforbundet uu yahay urur aad u weyn oo wakiil ka ah xirfadlayaal kala duwan, haddana waxaan u dhisannahay qaab xaqiijinaya in baahida gaarka ah ee xirfadlayaashii isku koox ahba si haboon wax looga qabto.

Fagforbundet Info. Foto: Trond Isakseen. Trykk: Aktietrykkeriet. 1000 3/2017.

Ku soo biir Fagforbundet

TO BE COMPLETED BY ALL NEW MEMBERS

Medl.nr. **COMPLETED BY FAGFORBUNDET**

Surname _____
First name _____
Date of birth and ID no. (11 digits) _____
Address _____
Post code _____ Postal area _____ Tel. no. mobile or home _____
E-mail _____

I do not wish to receive e-mail or text messages that are not related to my job circumstances or membership.

Personal information accessed by Fagforbundet will be handled confidentially and in accordance with the Personal Data Act. In exceptional cases, Fagforbundet hands over membership information, e.g. to membership surveys and similar, where Fagforbundet finds that provision of this information makes a positive contribution to safeguarding and improving the interests of members. Fagforbundet will always ensure that personal information is only used for the agreed purposes and that the recipient handles the information in accordance with the regulations in the Act.

I accept and give consent that Fagforbundet, in exceptional cases, can hand over my personal information.

TO BE COMPLETED BY ALL THOSE IN ACTIVE EMPLOYMENT

Employer _____
Workplace _____ Tel. _____
Occupation/qualifications _____ Position _____ Percentage of full time _____
County _____

TO BE COMPLETED BY UNIVERSITY/COLLEGE STUDENTS, APPRENTICES AND HIGH SCHOOL STUDENTS

- Student, NOK 250 per 6 months, including benefit fund and LOfavør home insurance Univ. coll. University
 Apprentice, free
 Apprentice, NOK 250 per 6 months, including benefit fund and LOfavør home insurance
 High School Students, free VG1 VG2 VG3
 High School Students, NOK 250 per 6 months, incl. benefit fund and LOfavør home ins. VG1 VG2 VG3

Place of study/apprenticeship location _____

Subject/field of study _____ Planned exam. date/qualifying examination (month/year) _____

TO BE COMPLETED BY ALL: Date _____ Signature _____

INSURANCE

On joining as someone in active employment, you will automatically be covered by the LOfavør home insurance, NOK 70 per month and the Fagforbundet benefit fund, NOK 26 per month.

In addition, NOK 23 per month is payable to the training, development and information fund (OUO Fund).

You will also be enrolled in the Fagforbundet group insurance scheme – a combined life, disability and accident policy, unless you choose to opt out of this. You will receive more information about this in your welcome letter on joining Fagforbundet.
NBI Does not apply to high school students, apprentices and university students.

On joining, you will receive a letter from us containing further information about our group insurance scheme.

Please write clearly and provide accurate information, and hand the form to your local employee representative, or send by post to:


Fagforbundet,
Postboks 7003 St. Olavs plass
0130 Oslo



Fagforbundet
Svarsending 0190
0090 Oslo



FAGFORBUNDET



Adressaten betaler
for sending i Norge

Please fold and stich together. Postage prepaid.



FAGFORBUNDET



Sidaa awgeed ururka waxaa loo qaybiyay afar waaxood:

- Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada (SHS)
- Waaxda Kaniisadaha, dhaqanka, carruurta iyo Dhallinyarada (SKKO)
- Waaxda Shaqaalaha Gaadiidka Dadweynaha iyo Fasamada Gacanta (SST)
- Waaxda Xafiisyada iyo Maamulka (SKA)

Waaxahaani waxay ka shaqeeyaan arrimo nidaam-dejinta la xiriira oo loogu talagalay xirfadlayaal kala duwan sida nidaamka tababarrada, usluubta shaqaalaha iyo degaanka shaqada. Waxay kaloo gacan ka geystaan arrimaha la xiriira heshiiska mushahaarka mideysan.

Dhibaatooyinka goobaha shaqada?

Way adag tahay inaad kaligaa wax ka qabato dhibaatooyinka goobaha shaqada. Waqtiyada noocaas oo kale ah waxaad u baahan tahay urur shaqaale oo adag iyo wakiil xirfad sare leh oo taageero dhab ah kuu fidiya.

Sida caadiga ah murammada dhexmara shaqaalaha iyo iyo shaqo-bixiyaha waxaa xalliya wakiilka degmada ee ururka shaqaalaha.

Wakiil ka socda Fagforbundet ayaa jooga degmo kasta iyo goob kasta oo shaqo oo Norway ah oo xubno ururkayaga ka mid ahi ay joogaan.

Intaas waxaa dheer, iyadoo ururku uu leeyahay tiro qareenno ah oo iyagoo la shaqaynaya waaxda qaanuunka ee LO xubnaha ururka ka caawiya dhibaatooyinka ay kala kulmaan goobaha shaqada.

Waxbarasho sare oo bilaash ah

Fagforbundet wuxuu sannad kasta xubninhiisa siiyaa waxbarasho sare oo bilaash ah oo ay ku kacdo lacag gaaraysa malaayiin karoon. Waxaad sannadkii heli kartaa ilaa NOK 12,000 oo loogu talagalay inaad waxbarashadaada kor ugu qaaddid.

LOfavør

Waxaa kaloo faaiidooyinka xubinnimada ka mid ah LOfavør. LOfavør waxaad ku helayasaa heshiiska caymiska guryaha ee ugu jaban uguna fican iyo weliba heshiisyo kale oo faaiidooyin kuu leh. Booqo www.lofavor.no si aad u aragtid faaiidooyin kale oo dheeraad ah.

Wargsyska Fagbladet

Fagforbundet wuxuu soo saaraa wargeys loogu talagalay xubnaha ururka oo la yiraahdo Fagbladet. Tirsi kasta waxaad ka helayasaa qayb gaar ah u ah waax kasta oo ka mid ah waaxaha ururka, oo aad ka akhrisan kartid wararkii ugu dambeeyay ee waaxda aad ka tirsan tahay.

La dagaallanka saboolnimada

Fagforbundet waxaa ka go'an la dagaallanka sabool-

nimada ka jirta Norway iyo caalamka intiisa kaleba. Waxaan ka qaybgalnaa ololayaal badan oo saboolnimada lagula dagaallamay.

Sidoo kale, waxaan dalka Angola ka dhisanay tuulo carruureed loo yaqaan SOS, waxaanuna maamulnaa mashaariic gargaar oo ay ka mid yihiin mashruuc aan ka wadno Falasdhiin annagoo kaashanayna hay'adda (Norwegian People's Aid).

Qiimaha ka mid noqoshada ururka

Qiimaha ka mid noqoshada ee xubnaha shaqeeyaayi waa boqolkiiba 1.45 oo mushahaarka oo isku duuban ah oo ay la socoto kharash caymis oo khasab ah iyo wax ku darsiga sanduuqa waxbarashada iyo horumarinta.

Ururkaaga degmadu wuxuu ku saari karaa lacag dheeraad ah. Qaar lacagta xubinnimada ka mid ah waxaa laga gooyin karaa canshuurta aad bixisid.

Xubinnimadu waa u bilaash ardayda iyo tababar-tayaasha 20 sano ka yar ee dhigta dugsiyada sare ee gaarka ah (videregående) ama dugsiyada sare ee caadiga ah (folkehøyskole).

Haddii aad wax su'aal ah qabtid fadlan ha ka wahsanin inaad soo wacdid khadkayaga gargaarka oo ah 23 06 40 00